

ACCESS 2.0 (Imtixaanka Fahanka iyo Kuhadalka Ingiriiska ee Gobal ilaa Gobal)

Qiimeynta waxay siisaa warbixin qiimo leh ardayda, waaladiinta iyo macalimiinta oo kusaabsan in ardaydu ay gaareen heerka fasalka laga rabo iyo heerarka udagsan maadada ayna kusocdaan wadadii qalin jabinta oo udiyaarsan qarniga 21 aad. Natiijooyinka qiimaynta waxaa loogu talagalay inay hal cadayn unoqdaan hormarka aqooneed ee cunugaaga.



MAXAY TAHAY QIIMAYNTAAN?

ACCESS 2.0 waa imtixaanka sanadlaha ah ee kooban kaasoo lagu imtixaano ardayda maadooyinka Cilmiga Bulshada iyo hormarka aqoonta luuqada Ingiriiska ee dhinacyada Dhagaysiga, Akhriska, Qorista iyo Kuhadalka. Waa imtixaan gobalka qasab ka ah kaasoo buuxinaaya shuruuda heer federaal ee lasocshada Ardayda Ingiriiska Barta. Dhamaan ardayda kujira fasalada K-12 kuwaasoo loo aqoonsaday inay yihiin bartayaasha luuqada Ingiriiska ayaa laga doonayaa inay imtixaanka galaan.

Hadii cunugaagu dhigto fasalka Koobaad, wuxuu gali doonaa dhamaan afarta imtixaan ayagoo adeegsanaaya imtixaan waraaqda iyo qalin qoriga. Hadii cunugaagu kujiro fasalaa 1-12, imtixaanka oo dhan waxaa lagu qaadi karaa oonleen ahaan, si guud imtixaan waraaq ah, ama oonleen halka qaybta qorista uu kuqaadanaayo waraaq.

Ardayda dhigta fasalada 1-12 kuwaasoo ah ardayda barata luuqada Ingiriiska lehna cilad muuqata oo dhanka fahanka ah ayaa kaqaybgalaaya imtixaan gaar ah oo ACCESS ah looguna talagalay ardayda ELLs. Imtixaankaan waxaa gabi ahaanba lagu qaadaa waraaq.

Imtixaanka waraaqda lagu qaado ayaa laga heli karaa dhamaan heerarka fasalada lana siinaayo arday kasta oo ubaahan inuu galo, ayna kujiraan kuwa qoraalka.



XAGEE AYAA CUNUGAYGA IMTAXAANKA LOOGA QAADAYAA?

ACCESS 2.0 waxaa laqaadaa bilaha Janaayo iyo Feebaraayo waxaana lagu qadaa qaab oonleen ah int badan ardayda. Waydii dugsiga cunugaaga jadwalka gaarka ah ee imtixaanka. Canugaada waxaa la imtixaamayaa kaliya maalmaha qaarkood sida ku saleysan fasalka iyo maadada, ma ahan xiliga lagu gudo jiro qeybta oo dhan. Fadlan laxariir macalinka cunugaaga si aad uhesho xiliyada gaarka ah ee jadwalka imtixaanka.



WAA MAXAY BUUNDOOYINKA CUNUGAYGU HELI DOONO?

Warbixinta buundada ee waalidka ayaa guriga loogu dirayaa bisha Maajo ayadoo ay lasocdaan macluumaad gaar ah oo laxariira dadaalka aqooneed ee cunugaaga. Waxaad helayaa buundooyinka guud oo isku ah 8 ee cunugaaga. Buundooyinka waxaa laguusoo gudbiyaa 6 heer oo dhanka aqoonta ah:

1 – Heerka bilowga ah	2 – Soo kobcaaya	3 – Hormar samaynaaya	4 – Sii balaaranaaya	5 – Soo kabanaaya	6 - Kusii dhaw heerkii laga rabay
-----------------------	------------------	-----------------------	----------------------	-------------------	-----------------------------------

Waxaad helayaa buundooyin gaar ah oo uu kakeenay Dhagaysiga, Akhriska, Qorista iyo Kuhadalka. Ayadoo la adeegsanaayo kuwaan, buundooyinka soosocda ee celceliska ah ayaa lagasoo qaadaa:

- Luuqada Kuhadalka – waxay kakoobantahay kuhadalka (50%) iyo dhagaysiga (50%)
- Akhrinta – akhriska (50%) iyo qorista (50%)
- Fahanka – dhagysiga (30%) iyo akhriska (70%)
- Buundada Guud - dhagaysiga (15%), kuhadalka (15%), Akhriska (35%), iyo qorista (35%)



SIDEE AYAA BUUNDOOYINKAAN LOO ADEEGSANAYAA?

Buundooyinka ACCESS 2.0 ayaa loo adeegsanayaa in lagu wargaliyo macalimiinta heerka aqoonta luuqada Ingiriiska ee arday kasta. Tani waxay gacan kagaysanaysaa nooca casharka ee ugu haboon ardayda. Waxay gacan kagaysanaysaa go'aaminta goorta Ardayga Ingiriiska dhigta diyaar u yahay inuu kubiirto fasalada caadiga ah ee ardayda Ingiriiska ku hadasha. Heerka aqooneed ee guud oo dhan 4.0 ama kasii sareeya iyo aqoonta Luuqada oo dhan 4.0 ama kasii saraysa ayaa laga doonayaa ardayda si looga saaro adeegyada Barashada Luuqada Ingiriiska.



WARBIXIN DHEERAAD AH

Waxaan kugu dhiirigalinaynaa inaad kaqaybgasho waxbarashada cunugaaga. Fadlan haka daahin inaad laxariirto macalinka ardaygaaga si uu kuugu sheego qaababka aad kucaawin karto cunugaaga markuu guriga joogo iyo helitaanka caawimaado dhanka imtaxaanka ah.

Wixii macluumaad dheeri ah: WIDA

- Booqo <https://www.wida.us/downloadLibrary.aspx>, arag Tababarada oonleenka ah ee Qoysaska ee kujira ciwaanada caadiga ah

Wixii macluumaad dheeri ah: Qiimeynada

Booqo:

- <http://assessments.dpsk12.org>
-

Hadaad su'aalo iyo walaacyo kaqabto imtaxaanada, fadlan laxariir dugsiga cunugaaga si toos ah ama wac Adeegyada Deegnaaka Qoyska oo nambarkoodu yahay (720) 423-3054.